Habeenka madow


Qaybta 3aad



Waxa turjumay:

Bukhaari Cabdiraxmaan Cumar

@SOMALIBOOKS



4-baadhistii dr.calaa`



…Waxa uu bilaabay (dr.calaa`) baadhista caruusadda isaga oo isku dayaya badbaadinta nolosheeda…

(Khaalid) iyo walaalkii (Haani) xaggan ayay ducada dudubinayaan, iyaga oo **ilaahay** waydiisanaya in ay arrimuhu ku dhamaadaan khayr.

Waxa ay labadoodii indhood qabteen (towfiiq) iyo xaaskiisii (safa), iyagaana iska leh bustaanka.

Towfiiq: “maxaa dhacay (khaalid) waa maalinkii u horraysay ee aad timaaddo bustaanka xilligan dambe…”!!!

Khaalid ayaa cod dheer ku jaray (towfiiq) oo aan hadalkii dhammaysan waxana uu yidhi: “arrinkaa hadda looma fadhiyo”

Waxa u soo dhawaatay (safa) oo tidhi: “waxaan jecelnahay (khaalid) in aad xasisho

Haani: “waan xasilaynaa dhammaanteen **insha allaaH**”

Khaalid oo (safa) eegaya ayaa yidhi: “adoo raaliya dhar ma u keeni kartaa martideenan”?

Safa: “ooooW” maanay sidan dhar”!!!

(Khaalid) ayaa madixiisii lulay isaga oo garan la` si uu ugu sheego waxa dhacay

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Haani: “I maqla martidan waxaa turfeeyay gaadhi wadada marayay…waxaanay ku dhacday hortayada…waanu ka cararay…waanan soo qaadnay annaga oo caawinayna”

Safa: “een…een…een **laa xawla walaa quwwata illaa billaaH**…naxariis darnaayaa”!!!

Towfiiq: “(khaalid) wax fiican ayaad samaysay …sidaas ayay raganimadu ku jirtaa”

(Khaalid) ayaa indho kulul ku eegay haani isaga oo ka biyo diidsan hadalka uu ku dhawaaqay kadib waa uu dhoolo caddeeyay si murugo leh…waxaanu kor u eegay circa isaga oo murugaysan.

Towfiiq: “maxaa jira (khaalid)”?

Haani: “waxba…waxuu u murugoonayaa nolosha miskiintan caruusadda ah”

Towfiiq: “oo maxaa…”!!!

Waxa hadalkiisii dhexda kaga dhacay (Haani) oo leh:- “wakhti uma hayno su`aalaha…diktoorka aan waydiino haduu u baahanyahay caawin” …waxaanu isha qoodheeda ka eegay (safa) waxaanu ku yidhi: “orod (safa) soo qaad dharkii”…waa ay dhaaqday.

Haani ayaa garabka bidix ka soo fadhiistay walaalkii waxaanu ku yidhi: “daji naftaada (khaalid)”

Khaalid ayaa si cadho leh oo xanuun ku jiro u yidhi: “towfiiq waxa uu ka sheekaynayaa raganimo mana oga sheekada …”

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Waxaa hadalkii ka gooyay (Haani) oo ku yidhi dambiga aduuma ilihid…umana malaynayo in dhibka soo gaadhay badanyahay…waxaanay ku dhamaan doontaa khayr.

الله أكبر... الله أكبر

الله أكبر... الله أكبر

أشهد أن لا إله إلاّ الله

أشهد أن لا إله إلاّ الله...

Waa aadaankii salaada subax oo laga eedaamayo masjid u dhow bustaanka.

Haani: " xaq AllaahHu AkbaR…ina keen aan soo tukanee salaada…una soo ducaynao miskiintane"

Khaalid ayaa eegay isaga oo leh: "inna marsha…waxaan kaa doonayaa in aad tagto gurigeenii iskandariya"

Haani ayaa si la yaab leh u yidhi: "girigiiyaa!!!...oo maxaa…"!!!

Khaaalid: "si ay u yimaadaan hooyo iyo yaasmiin xagan…waana lagama maarmaan"

Haani: "oo maxaanu sheegaa"?

Khaalid: "warka xaqiiqdiisa u sheeg mar labaadna been ha sheegin… mana doonayo in hooyo laga qariyo arrinakan oo kale"

Haani: "sax weeyi"

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Khaalid ayaa wax xasuustay waxaanu yidhi: “hana illoobin in aad yaasmiin u sheegto in ay soo qaado dhar dheeraad ah…waa isku da`eh”

Khaalid: “inna keen aan waysaysannee”

Haani: “diyaar ban ahay”…waanay soo tukadeen



5-barqadii

Telegram @SOMALIBOOKS

waxaa albaabka bangalada soo istaagay gaadhiga(daarhir assamari), si dagdag ah ayaa uu uga soo booday gaadhigii waxaanu u dhaqaaqay dhanka albaabka…intii aanu gaadhin waxa ay indhihiisu qabteen murugo muuqata ambulance iyo gaadhigii police ka oo taagan albaabka…waxaanay dhakhatiirtii ka soo saarayaan bangalada qof dhibban…waanay la yaacayaan.

Dhinocoogii ayuu u cararay daahir isaga oo ku qaylinaya “inantaydii…inantaydii…inantaydii”!!!

Dhakhtarkii ayaa u diiday in uu usoo dhawaado … laakiin dhinac ayaa uu iskaga riixay isaga oo leh “waxaan rabaa in aan arko inantayda”.

Waxa uu dul istaagay qofkii dhibbanaha ahaa…waanu gartay…waxa uu ahaa wiil dhallin yar ah oo uu wajigiisa ka da`ayo dhiig daboolayna.

somali-books
FREE EDUCATION

Daahir waa qayliyay waxaanu yidhi “{muraad}”!!!...”maxaa kugu dhacay muraad”

Waxaa ka riixay dhakhtarkiiwaxaanu ku yidhi “ka tag dhibbanaha inta laga dawaynayo”

Daahir: “khataraa”!!!

Dhakhtarkii: “haa madaxa ayaa uu dhib wayn ka qabaa”

Waxaa lagu qaaday muraad gaadhigii…waxaana loola dhaqaaqay xagaa iyo dhakhtarkii.

Daahir: “aaway gabadhaydii”?

Dhakhtarkii: “askarta waydii…gudaha ayay ku jiraane”!!!

Waxa uu galay daahir gudihii, waxaanu ku arkay dhow askar ah oo uu la joogo dambi baadhihii, waxaa arkay ilaaliyihii{ mustafe} waxaanu yidhi “kumaad tahay”?

“waxaan ahay daahir assamari…ganacsadaha caanka ah ee iskandariya”

Dambi baadhe Mustafe: “daahir maxaa xagan ku keenay”?

Daahir: “muraad waa wiilkaan adeerka u ahay”madaxa ayuu lulay mustafe isaga oo fahmay

Dambi baadhe: “laakiin sideed dagdagan ugu ogaatay waxa dhacay”?

Wajigii daahir ayaa madoobaaday indhihiisiina murugo ayaa buuxusay…mana awoodo in uu su`aal ka jawaabo…umuu iman in uu ogaado muraad arrinkiisa laakiin wuxuu u yimiday ogaanshaha xalaaada inantiisa…

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS

Waxaanu ku yidhi (dembi baadhihii): “dhab ahaan maan ogayn dhacdada…laakiin waxaaan raadinayay gabadhaydii…waxaanan la kulmay waxa ku dhacay muraad…waxaanan doonayaa in aan la kulmo muraad oo aan ka waraysto arrimaha gabadhayda…waana waqti dambe…mukhkilad ma noqon kartaa”?

Dembi baadhe: “dhab ahaan maya mushkilad ma laha…waxa muhiim ah in la ogaado cidda isku dayday dulitaankiisa”

Daahir: “isku day dil aaa… xaqiiqda maxaa ku dhacay muraad?”!!!

Dembi baadhe: “illaa immiga ma ogin xiqiiqada…waxaan la xidhiidhnay dadkii ka ag dhowaa goobta dhacdada…dhammaan waxa ay sheegayaan in ay maqlayeen rasaas…markii aan tagnayna waxaan helnay qof dhaawac ah oo dhulka yaalaa oo dhiigiisa ku galgalanaya”

Waxaa korodhay murugadii daahir, waxaanu ku yidhi dembi baadhihii: “oo miyaydaan helin xaqiiqdii”

Dembi baadhihii: “maya weli laakiin waxaan u ogaan donna si dhab ah…annaga oo marayna baadhitaan”

Daahir waxa uu doondoon tagay inantiisii.

- Rasaastay dadku maqleen yaa riday?!!!
- Yay ku dhacday?!!!

La soco…

Telegram @SOMALIBOOKS

@SOMALIBOOKS